



**MILWAUKEE
PUBLIC SCHOOLS**

Office of the Superintendent
5225 W. Vliet Street
Milwaukee, WI 53208
(414) 475-8001 • mpsmke.com

Janaayo 30, 2021

Bulshada MPS ee Qaaliga ahaaw,

Maalintii Khamiista, Janaayo 28, 2021, Gudiga Agaasimayaasha Dugsiga Milwaukee waxay si aqlabiyad leh ugu codeeyeen in la sii wado qorshaynta si tartiib ah loo bilaabay waxbarashada qof ahaan looga soo xaadirayo iskuulka.

Hadafku waa in la bilaabo bixinta waxbarashada qof ahaan looga soo xaadiro iskuulka laga bilaabo Febraayo 8, 2021, ugu yaraan 300 oo arday oo leh Barnaamijyada Waxbarasho ee Gaarka ah (IEPs). Waaxda Adeegyada Gaarka ah waxay toos ula xiriiri doontaa qoysaska. Taariikhda bilowga ah ee la qorsheeyay ee waxbarashada qof ahaan loo bixiyo ee ardayda dhigata dugsiga xanaanada carruurta ilaa fasalka 2 waxay u bilaaban doontaa Abriil 12, 2021, ardayda fasalada 3aad ilaa 8aad waxay u bilaaban doontaa Abriil 19, 2021, iyo ardayda fasalada 9aad ilaa 12aad waxay u bilaaban doonaan Abriil 26, 2021.

Waxaan ogsoonahay in qoysaska qaar ay ka waaban karaan go'aankan. Caafimaadka iyo badbaadada ardaydeena, shaqaalaha, iyo bulshada ayaa sii ahaan doona ahmiyadeena koowaad maadaama MPS ay qorsheyneyso ku laabashada waxbarashada qof ahaan looga soo xaadiro oo amaan ah loona fulinayo si masuuliyad leh. Waxaan ku faraxsanahay inaan horey u socono oo aan xulashada waxbarashada qof ahaaneed aan u fidino qoysaska doonaya inay ilmahoodu aadaan fasalka. Waxaan sidoo kale fahansanahay in dhamaan qoysaska aysan ku raacsanayn xulashadan, sidaa darteedna waxaan sii wadi doonaa inaan waxbarashada khadka tooska ah aan siino qoysaska dareemaya inay tahay xulashada ugu wanaagsan ee cunugooda.

Si loo xaqiijiyo inaan u diyaar u nahay xaalada kala guurka, waxaan sii wadeynaa inaan kormeerno caafimaadka bulshadayada MPS. Waxaan sii wadi doonaa inaan hubinno kuleylka 'hawo, hawo mareenka, iyo hawo qaboojiyaha (HVAC) ee dhismaha, qalabka ilaalinta shaqsiyadeed (PPE), borotokoolada nadaafada iyo jeermis dilka, qolalka isgo'doominta, iyo shuruudaha albaabada inay waafaqsan yihiin ilmaamaha federaalka, gobolka, iyo kuwa deegaanka.

Waxaad akhrisan kartaa [Mooshinka Dib U furida Wajiyada Badan Leh](#) ee Guddiga si aad u hesho faahfaahin buuxda.

Waxaan kaaga mahadcelineynaa iskaashigaaga joogtada ah ee kaabaya taageerida waxbarashada ardayda, waxaan qiimeyneynaa dabacsanaanta iyo wada shaqeynta noogaga imaanaysa ardaydayada, qoysaska, shaqaalaha, xubnaha guddiga, iyo iskaashatooyinka ururka. Waxaan garwaaqsannahay inaad su'aalo dheeri ah qabi kartid, inta aan kusii dhowaanayno taariikhahayaga dib u furitaanka wajiyada kala gedisan leh, waxaan sii wadi doonaa inaan soo dirno warbixino cusub iyo macluumaad si loo xaqiijiyo in adiga iyo ardaygaagu aad ka warqabtaan xulashooyinkiina. Inta lagu jiro Wareegga Maarso ee Guddiga, go'aan ayaa la gaari doonaa haddii jadwalka la soo jeediyey uu habboon yahay.

Ku joog caafimaad iyo badbaado.

Mahadsanidiin,

Dr. Keith P. Posley
Kormeeraha Guud ee Iskuulada (Superintendent of Schools)